Socialstyrelsen

Daryeel waafaqsan

LPT

Xuquuqdaada daryeelka khasabka ah

Macluumaad loogu talagalay adigaaga ka yar 18 sano ee u baahan daryeelka khasabka ah oo xagga dhimirka

Tusmada qoraalka

Waxaad xaq u leedahay daryeel wanaagsan	3
Daryeelka khasabka ah ee uu qabo LPT-gu	4
Waxaad xaq u leedahay inaad hesho macluumaad	6
Yaa heli kara macluumaad adiga ku saabsan?	7
Waxaad xaq u leedahay qof taageero ah	8
Xuquuqda qaarkeed waa la xaddidi karaa	10
Tallaabooyin khasab ah	12
Waxaad xaq u leedahay inaad racfaan qaadato	14
Haddii aadan qanacsaneyn ama aad su'aalo qabtid	15
Qaamuuska iyo soo gaabinta erayada	16

Waxaa faafintan ilaalinaya xeerka milkiyadda fikirka.
Haddii wax laga soo xigto
waa in la sheegaa isha wax laga soo qaatay. Si muuqaallada iyo sawirrada loo isticmaalo, waxaa loo baahanyahay in oggolaasho laga heysto cidda iska leh.

Faafintu waxay ku jirtaa iyadoo pdf ah barta intarnetka ee Guddiga Adeegga Bulshada.
Faafinta waxaa sidoo kale loo soo saari karaa qaab kale, haddii la dalbado. Su'aalaha ku aaddan qaababka la kala dooran karo waxaa loo dirayaa alternativaformat@socialstyrelsen.se.

ISBN 978-91-7555-534-8
Nuqul nr 2020-7-6854

Madbacadda Åtta.45 Tryckeri AB, daabacaadda koowaad, daabicidda labaad, agoosto 2020
Sawirka Johnér Bildbyrå AB, Bildarkivet, Jörgen Wiklund

Dadka sawirka ka muuqda wax xiriira lama laha nuxurka

SVANENMÄRKET 3041 0001 TRYCKSAK

Waan ku salaamay!

Magaceygu waa Rebecca. Isma naqaanno, laakiin waxaan rabaa inaan wax kuu sheego.

Dunideydu way duntay markii aan ahaa 15 jir. Waxaa igu dhacay niyad-jab, waxaan cabbayay khamri badan, waxaana guriga ka jirtay rabshad. Waxaan ahaa 15 jir, waxaanna ugu dambayntii rabay inaan dhinto.

Subax ayey booliisku i soo qabteen si leygugu daweeyo khasab.
Dad badani waxay u arkayeen inaanaan rejo lahayn, waxaanna isu arkayay sidaas. Ma aamini jirin dadka waaweyn.

Ma ogi waxa aad la soo kulantay adigu. Laakiin inuu qofku dareemo inuu dhacay, wax walba lumiyay, ooyo, uuna xanaaqo waa caadi. Xanuunku wuu dhammaanaya, noloshuse ma dhammaanayso. Waxaa jira dad badan oo waa weyn oo lagu kalsoonaan karo.

Ha ogolaanin in xaaladi, cudur ama bani'aadani kaa keeno inaad isdhiibto. Noloshu way isbeddeli doontaa, waxaadna maalin aad ugu faani doontaa inaad tan ka gudubtay.

Taabo gala goyskaaga gacanta – halbowlahaagu wuu garaactamayaa – weli waad nooshahay!

Waxaad tahay qof muhiim ah, qiimo leh, xoog badan, geesi ah, aysanna jirin cid la mid ah. Waa laguu baahanyahay, waana ku aaminsanahay anigu!

Hab ayaan ku siiyay Rebecca

Qoraa iyo muxaadir

Halkan, waxaad ku qoran kartaa waxyaabo aad rabto inaad xasuusato

Waxaad xaq u leedahay daryeel wanaagsan

Daryeelku waa inuu ahaadaa mid aamin kuu ah adiga iyo dadka kale oo dhanba.

Shaqaaluhu waa inay ahaadaan kuwo waxbarartay oo leh khibrad caafimaad oo sax ah. Waana inay tixgeliyaan waxa adiga kuu fiican marka lagu siinaya daryeelka.

Mar walba wax ma noqon karaan sida aad rabto, laakiin waxaad mar had iyo jeer xaq u leedahay inaad sheegto sida aad wax rabto.

Goormeebaa khasab lagu daryeeli karaa qofta?

Caadi ahaan ma jirto cid ku daryeeli karta adigoon rabin. Laakiin waxaa taas la sameyn karaa haddii ay buuxsamaan seddax shuruudood oo ka mid ah Xeerka Khasab ku Daryeelidda Dadka Maskaxda la' (LPT).

Shuruudaha ay khasab tahay in ay buuxsamaan:

- Waa inaad qabto isku buuqsanaan daran oo xagga maskaxda ah.
- Waa inaad afar iyo labaatanka saacba u baahan tahay daryeel caafimaad oo xagga maskaxda ah.
- Waa inaad ka soo horjeesatay daryeel aad u baahan tahay.

Daryeelka khasabka ah ee uu qabo LPT-gu

In khasab laguuugu daryeelo si waafaqsan LPT-gu waxay ka dhigantahay in laba taqtar oo kala duwan ay u arkeen inaad u baahan tahay daryeel khasab ah iyadoo laga duulayo xeerka khasab ku daryeelidda dadka maskaxda la'.

Yaa go'aaminaya in khasab laygu daryeelo?

Waxay ka billaaban kartaa in cid agagaarkaaga ahi ay u aragto in xaaladdaada maskaxeed ay aad u xuntahay oo ay kaa caawiso in ay ku geyso rug caafimaad. Waxaa dhacda inuu booliisku u baahdo inuu wax caawiyo.

Marka uu taqtari u aragyo inaad u baahan tahay daryeel khasab ah waa inuu ku baaraa, sharraxaa dhibaatooyinkaaga, sheegaana sababta aad ugu baahan tahay in adigoon rabin lagu daryeelo, waana inuu qoraa shahaaddo daryeel.

Laakiin inta aan si khasab ah laguu daryeelin waa inuu taqtar kale ku baaraa oo uu go'aamiyaa in ay taasi tahay waxa loo baahan yahay.

Waxaa lugu billaabayaa daryeel xiran

Billawga here ee daryeelka khasabka ah waxaad joogi doontaa qeyb xiran habeen iyo maalinba. Mararka qaar waxaa waqti ka dib la codsan karaa daryeel khasab ah oo furan. Waxay taasi ka dhigantahay inaadan u baahneyn inaad isbitaalka joogto habeen iyo maalinba ilaa inta aad raaceyso go'aamada uu taqtar gaaro. Waxay kuwaasi noqon karaan inaad degganaato meel go'an, dawo qaadato, ama ka qeyb qaadato daweyn nafsi ah.

Waa inaad lahaataa qorshe daryeel

Shaqaalahu waa inay sida ugu dhakhsaha badan ee suurta galka ah u sameeyaan qorshe loogu talagalay daryeelkaaga. Waa inuu halkaas ku qornaadaa daryeelka aad u baahan tahay iyo sida uu u ahaan karo mid aad u fiican si aadan ugu baahan in khasab laguugu sii daryeelo.

Goormuu dhammaanayaa daryeelka qasabka ahi?

Taqtarka ayaa mar walba qiimeynaya inaad buuxineyso seddaxda shuruudood ee khasab ku daryeelidda qofka in kale. Haddii aadan buuxineyn mid ka mid ah shuruudaha laguuguma sii daryeeli doono si khasab ah.

Haddii ay seddaxda shuruudood weli buuxsanyihiin waa inuu taqtarku, ugu dambeyn afar toddobaad gudohood, codsi ugu diraa maxkamad (maxkamadda maamulka) oo dheereyn karta waqtiga daryeelka. Wax xad ah ma laha inta jeer ee la dheereyn karo.

Ujeeddada daryeelka khasabka ahi waa inaad noqoto sida ugu fiican ee suurta galka ah, si aad u hesho daryeelka aad u baahan tahay iyadoon khasab ahayn.

Waxaad xaq u leedahay inaad hesho macluumaad

Shaqaaluhu waa inay ku siiyaan macluumaad si aad wax u fahanto, waana inay ka jawaabaan su'aalahaaga.

Waxaad xaq u leedahay inaad macluumaad ka hesho daryeelka aad hadda hesho iyo haddii ay jiraan wax qorsheysan oo mustaqbalka ah.

Waxaad xaq u leedahay inaad ogaato sida ay kuu saameyn karaan dawooyinku, daweynta nafsigu iyo waxyaabaha kale ee aad la kulanto inta aad ku jirto waqtiga daryeelka.

Macluumaad ku saabsan daweynta iyo dawooyinka

Shaqaalaha ayaa kuu sheegi doona sida ay daweynaha kala duwan iyo dawooyinku kuu saameyn karaan adiga iyo jirkaaga. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad ogaato haddii ay jiraan khataro la xiriira daweynta, haddii ay wax dhici karaan marka aad dawada qaadato intii waqti ah, iyo waxyeello dhenaceedyada ka imaan kara.

Waxaad akhrisan kartaa waxa ay shaqaaluhu qoraan

Waxaad xaq u leedahay inaad akhrisato qorshahaaga daryeelka. Haddii ay suurta gal tahay waa inay shaqaaluhu wadajir adiga kuula sameeyaan qorshaha daryeelka. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad akhrisato feylkaaga caafimaadka. Laakiin haddii uu taqtarku u aragyo inaad ku xumaaneyso ama uu daryeelkaagu ku xumaanayo inaad akhrisato feylka caafimaadka waa laga qarin karaa markaas macluumaadka.

Waxaad xaq u leedahay inaad waxa weydiiso ilaa aad ka fahanto waxa ay sheegayaan shaqaaluhu.

Yaa heli kara macluumaad adiga ku saabsan?

Sida caadiga ah waa in waaliddiintaadu ay wax ka helaan macluumaadka ku saabsan caafimaadkaaga iyo waxyaabaha kale ee qof ahaaneed. Laakiin da'daada iyo bisseylkaaga ayaa door ka ciyaaraya haddii ay xaq u leeyihiin inay helaan macluumaadka iyo haddii kale. Haddii aad caafimaad ahaan aad ugu xumaaneyso inuu macluumaadku gaaro waaliddiintaada waa la qarin karaa.

Daryeelka waxaa xukuma sharciga sir-qarinta

Sir-qarintu waxay ka dhigantahay in shaqaaluhu aysan cidna uga warrami karin caafimaadkaaga ama waxyaabahaaga kale oo qof ahaaneed. Laakiinse macluumaad adiga kugu saabsan way u gudbin karaan isbitaal ama sooshaalka haddii taas loo baahdo si aad u heli karto daryeel, daweyn ama taageero aad u baahan tahay.

Shaqaaluhu way gudbin doonaan warkaaga haddii aad dhibaato ku jirto

Haddii ay shaqaaluhu ka shakiyaan ama ogaadaan inaad dhibaato ku jirto waxay markiiba warkaaga u gudbin doonaan Sooshaalka. Waxay tusaale ahaan taasi imaan kartaa haddii ay ka shakiyaan in laguu geysto cunfi ama ay u maleeyaan in uusan waalidkaagu si fiican kuu daryeeli karin. Waxaa loo arki karaa dhib in ay waxa gudbiyaan, laakiin sida uu sharcigu qabo waajib ayey ku tahay inay taas sameeyaan.

Marka uu war noocaas ahi soo gaaro Sooshaalka waxay eegi doonaan inaad iyaga uga baahan tahay taageero iyo caawimaad iyo in kale. Waxaad xaq u leedahay inaad hesho macluumaad iyo inaad sheegto aragtidaada.

Waxaad xaq u leedahay qof taageero ah

Qofka taageerada ahi waa qof weyn oo dibadda ka imaanaya oo ku siinaya taageero marka si khasab ah laguu daryeelayo iyo hal bil ka dibba.

Qofka taageeradu wuxuu kaa caawinayaa waxyaabahaaga qof ahaaneed, wuu kula hadlayaa, wuxuuna kula qaadanayaa waqti.

Qofka taageerada ahi adiga ayuu taageero kuu yahay, ee uma aha shaqaalaha ama waaliddiintaada.

Xeerarka dadka taageerada ah

Qofka taageerada kuu ah wuxuu kuu soo boqan karaa si joogto ah, laakiin mararka qaar saacadaha iyo jadwalka waaxda ayaa xukuma booqashooyinka. Marka laga soo tago booqashooyinka, wuxuu tusaale ahaan qofku ka qeyb geli karaa shirarka ku saabsan daryeelkaaga, wuxuuna kuu noqon karaa garab marka ay jiraan wadahadallada maxkamadda maamulku.

Qofka taageerada ah waxaa saaran waajib sir qarin marka ay timaado caafimaadkaaga iyo macluumaadka kale ee shakhsi ahaaneed. Waxay taasi ka dhigan tahay inuu dad kale u sheegi karyo/inay dad kale u sheegi karto haddii ay jiraan xaalado gaar ah oo keliya.

Sidan ayaad ku heli kartaa qof taageero ah

Shaqaalaha ayaa ku weyddiin doona haddii aad rabto qof taageero ah sida ugu dhakhsaha badan ee aad u dareento inaad ilaa heer fiicantahay oo aad fahmi karto macluumaadkaas.
Waa guddiga bukaannada cidda kuu dooreysa qof taageero ah. Haddii aad horbaba Sooshaalka ku ag leedahay qof xiriir kuu ah, qofkaas ayaa noqon karaa qof taageero kuu ah. Haddii aad rabto in lagaa beddelo qofka taageerada ah ama aad cabasho ka qabto, waxaad la hadli kartaa shaqaalaha daryeelka ama guddiga bukaannada.

Xuquuqda qaarkeed waa la xaddidi karaa

Marka laguugu daryeelayo goob xiran oo khasab loogu daryeelo dadka maskaxda la', waa la xaddidi karaa xuquuqda qaarkeed.

Telefoon, kombuyuutar iyo warqado

Inta badan xaqbaad u leedahay inaad isla xiriirtaan waaliddiintaada, mas'uuliyiinta xannaanada, qaraabadaada iyo asxaabtaada. Sidaas darteed waxaad la xiriiri kartaa ciddi aad rabto inta lagu jiro waqtigga daryeelka. Shaqaaluhu ma dhegeysan karaan wadahadalladaada telefoonka, mana akhrisan karaan waxa aad qoreyso.

Xaalado gaar ah awgood waa lagaa mamnuuci karaa inaad wactanto ama isticmaasho kombuyuutar. Waxaa taas keeni karta inay xiriirradu sababayaan inay xaaladdaadu xumaato ama uu adkaado daryeelkaagu. Sida ugu dhakhsaha badan ee ay meesha uga baxdo sababtii keentay in isticmaalidda kombuyuutarka ama teleefanka laguu diido, ayaad xaq ugu yeelaneysaa in mar kale isticmaasho iyaga.

Waxaad mar walba xaq u leedahay inaad warqad u dirsato qareen, garyaqaan guud ama hey'ad dowladeed oo aad warqado ka hesho iyadoon shaqaaluhu akhrin. Laakiinse shaqaaluhu waxay u baahan yihiin inay hubiyaan in boostada kuu socota aysan ku jirin khamri, daroogo ama wax kale oo ku dhaawici kara adiga amaba nidaamka isbitaalka. Haddii ay shaqaaluhu helaan waxyaabo noocaas ah, way kaa qaadi karaan.

Shaqaaluhu way baari karaan alaabtaada

Shaqaaluhu way baari karaan, haddii uu taqtarku u arko inay taasi lagama marmaan tahay, in aadan heysan waxyaabo aan laguu oggoleyn inaad heysato. Waxay waxaasi noqon karaan khamri, daroogo ama wax kale oo ku dhaawici kara adiga ama cid kale.

Marka wax la baarayo, waxay shaqaaluhu daba iyo dacal u baari karaan dharkaaga iyo boorsooyinkaaga. Waxay xitaa ku weyddiisan karaan inaad iska bixiso dharka si ay jirkaaga u arkaan isagoo qaawan. Shaqaaluhu ma taaban karaan jirkaaga.

Booqasho

Inta lagu jiro waqtiga daryeelka xaqbaad u leedahay inaad la kulanto dadka muhiimka kuu ah. Waaliddiintaada, walaalahaa iyo asxaabtaadu way imaan karaan marka ay tahay waqtigga booqashada ee waaxda.

Xaalado gaar ah awgood waa la xaddidi karaa booqashooyinkaaga. Waxay taasi ku saleysnaan kartaa inay booqashooyinku kuu keenayaan inay xaaladdaadu sii xumaato.

Hawlaha iyo joogitaanka dibadda

Waxaad xaq u leedahay hawlo maalinle ah oo laguugu daryeelayo oo aad dibadda joogeyso ugu yaraan hal saac maalintiiba.

Xaalado gaar ah awgood waa la xaddidi karaa xuquuqdan iyada ah. Waxay taasi ku saleysnaan kartaa inay hawluhu kuu keenayaan inay xaaladdaadu sii xumaato.

Si kastaba ha ahaatee, iskaa ugama tegi kartid waaxda ama aagga isbitaalka, marka khasab laguu daryeelayo. Si aad taas u sameyso waa khasab inaad oggolaansho ka hesho taqtarka. Waxaa taas loogu yeeraa fasax.

Waxaad mar walba xaq u leedahay inaad sheegto sida aad u aragto arrimaha ku khuseeya, dadka waaweynuna tixgelin ayey siinayaan taas.

– Laga soo qaatay Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Carruurta

Tallaabooyin khasab ah

Xalka keliya ee ugu dambeeya

Daryeelka xiran ee khasabka ah waxay shaqaalaha daryeelku xaalado gaar ah awgood sameyn karaan waxyaabo si toos ah uga soo horjeeda rabitaankaaga. Tallaabooyinka khasabka ah waxaa la qaadi karaa oo keliya haddii uusan jirin hab kale oo lagu beddeli karo xaalad deg-deg ah oo khatar kugu ah adiga ama cid kale.

Haddii laguu geystay tallaab khasbid ah waa in lagu qoraa feylkaaga caafimaadka.

Khasab ku siinta dawooyinka

Haddii aadan rabin inaad dawo qaadato, shaqaaluhu way ixtiraamayaan taas ilaa intii suurta gal ah. Laakiin saas oo ay tahay haddii uu taqtari u aragyo in ay khasab tahay inaad qaadato dawo go'an waa la oggolyahay in khasab lagugu siiyo dawooyinka markaas.

Cidna kuugama hanjabi karto in meel laguugu xirxirayo ama gooni lagaaga soocayo dadka kale.

In suun laguugu xiro

Wuxuu taqtarku go'aamin karaa in laguugu xiro suun, laakiin waa haddii ay jirto khatar weyn oo ah inaad is dhaawacdid oo keliya oo aysan jirin si kale oo la sameyn karo.

Marnaba laguuguma xirxiri karo meel in ka badan inta aadka lagama maarmaanka u ah.

Waxaad meel xirxirnaan kartaa ugu badnaan hal saac. Haddii ay tahay inaad meel xirxirnaato muddo dheer waa inuu taqtari gaaraa go'aan cusub oo shaqeynaya ugu badnaan hal saac.

Ma jiryo xad u go'an inta go'aan ee uu taqtarku qaadan karo. Laakiin sida ugu dhakhsaha badan ee aysan usii jirin sabab aad meel ugu xirxirnaato ayaa laguu deynayaa.

Shaqaalaha daryeelka ayaa qolka kugula jiri doonaa waqtigaas oo dhan.

Gooni u soocid – qol joogid

Taqtarku wuxuu go'aamin karaa in gooni laguu sooco, tusaale ahaan in lagu xiro ama lagaa hor istaago inaad qolka ka baxdo. Laakiin waa haddii aysan jirin si kale oo suurta gal ah oo la sameyn karo, oo keliya.

Si qofka gooni loogu sooco kuma filna inuu yahay qof arbushaad badan.
Waa inaad leedahay dhaqan weerar ah oo si halis ah u arbushaya daryeelka dadka kale.

Waxaad gooni u soocnaan kartaa ugu badnaan laba saacadood. Haddii ay tahay inaad soocnaato muddo dheer waa inuu taqtari gaaraa go'aan cusub oo shaqeynaya ugu badnaan laba saacadood.

Ma jiryo xad u go'an inta go'aan ee uu taqtarku gaari karo, laakiin sida ugu dhakhsaha badan ee aadan u keeneyn inay aad u adkaato in la daryeelo dadka kale waa lagu sii deynayaa.

Shaqaalaha daryeelku way ku soo eegi doonaan markii muddo la joogaba.

Waxaad xaq u leedahay inaad racfaan qaadato

Haddii aad u aragto in go'aan laga gaaray daryeelkaagu uu khaldan yahay waxaad u caban kartaa maxkamadda la yiraahdo maxkamadda maamulka, waxaa taas loogu yeeraa racfaan qaadasho. Laakiin go'aamada oo dhan lagama qaadan karo racfaan.

Shaqaalaha ayaa kuu sheegi doona sida la sameeyo

Shaqaalaha ayaa kuu sheegi doona go'aamada laga qaadan karo racfaanka. Waxay sidoo kale kuu sheegi doonaan sida la sameeyo iyo sida racfaanka loogu qoro maxkamadda maamulka.

Garyaqaan guud ayaa ku caawin kara

Haddii aad go'aan uga dacwooneyso maxkamadda maamulka waxay kaa caawin doonaan inaad la xiriirto garyaqaan guud. Qof weyn ayaa kaa caawinaya inaad racfaan qaadato oo aad la xiriirto maxkamadda. Waa bilaash in caawimaad laga helo garyaqaan guud.

Xuquuqda carruurtu waxay khuseysaa carruurta oo dhan. Tusaale ahaan wax micnaa ma sameynayaan midabka, jinsiga, luuqadda, qolanimada ama diinta uu qofku leeyahay.

– Laga soo qaatay Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Carruurta

Haddii aadan qanacsaneyn ama aad su'aalo qabtid

Waxaad mar walba la hadli kartaa shaqaalaha daryeelka ama taqtarkaaga. Way ku caawin doonaan, waxayna mas'uuliyad ka saarantay inaad hesho daryeel wanaagsan.

Fadlan ila soo xiriir!

Khadka Carruurta iyo Dhallinyarada

Haddii aad rabto inaad wax ka weydiiso xuquuqdaada ama aad sheegto wax aan si fiican u shaqeyneyn xagga daryeelka, waxaad la xiriiri kartaa Khadka Carruurta iyo Dhallinyarada.

Wicitaanku waa bilaash, mana ka muuqan doono faatuurada taleefanka.

Wac 020 120 06 06.
Khaddka taleefanku wuxuu furan yahay maalmaha shaqada 9–17.

Marka uu khadka taleefanku xiran yahay waxaad farriin ku reebi kartaa jawaabaha taleefanka. Uma baahnid inaad sheegto qofka aad tahay.

Qaamuuska iyo soo gaabinta erayada

Taqtarka sare ee madaxda ah	taqtar takhasus u leh cudurrada maskaxda oo mas'uul ka ah daryeelka khasabka ah ee dadka maskaxda looga jiro.
Maxkamadda maamulka	Maxkamadda gaari karta go'aanka khasab ku daryeelidda.
Go'aanka xereynta	Go'aanka daryeelka khasabka ah ee ay tahay in uu diyaar yahay inta aan si khasab ah laguu daryeelin. Taqtarka qoraya go'aanka xereyntu waa inuu ahaadaa mid takhasus u leh cudurrada maskaxda.
Qofka xiriirka ah	Qof ka mid ah shaqaalaha oo leh mas'uuliyadda gaarka ah ee kula xiriiridda.
LPT	Xeerka khasab ku daryeelidda dadka maskaxda la'.
LRV	Xeerka daryeelka dadka dembiyada gala iyagoo maskaxda la'.
Fasax	Fursad uu qofku iskiis ugu joogi karo meel ka baxsan aagga isbitaalka, tusaale ahaan guriga.
Daryeel xiran oo khasab ah	Daryeelka khasabka ah ee isbitaalka oo habeen iyo maalinba ah.
Shahaaddada daryeelka	Shahaaddada taqtarka ee ugu horreysa ee loo baahan yahay si laguugu daryeelo si khasab ah. Haddii ay jirto shahaaddo daryeel waxaa si rabitaankaaga ka soo horjeedda laguugu sii hayn karaa isbitaalka inta aan la go'aamin in si khasab ah laguu daryeelo ka hor.
Qorshaha daryeelka	Dukumiinti sharraxa daweynta iyo waxyaabaha kale ee aad u baahan tahay inta lagu daryeelayo.
Daryeel furan oo khasab ah	Laga yaabee in ay khasab tahay inaad qaadato dawo go'an ama ka qeybgasho daweyn, laakiin aadan u baahneyn inaad joogto isbitaalka habeen iyo maalinba.

Xuquuqda guud ee carruurtu waxay ku qorantahay Heshiiska Caalamiga ah ee Qaramada Midoobay, Heshiiska QM ee xuquuqda
carruurta. Heshiiska Caalamiga ah ee Qaramada Midoobay wuxuu Iswiidhan ka hayay sharci.

Xeerarka khuseeya bukannada oo dhan waxay ku jiraan xeerka daryeelka caafimaadka bukaanka (HSL), xeerka bukaanka iyo xeerka amniga bukaanka (PSL).

Xeerarka gaarka ah ee daryeelka dadka maskaxda la' ee ka soo horjeeda rabitaanka bukaanku waxay ku jiraan xeerka khasab ku daryeelidda dadka maskaxda la' (LPT).

Xeerarka ku saabsan sir-qarintu waxay ku jiraan xeerka bannaanyaalnimada iyo sir-qarinta (OSL).



Walxaha acluumaadka waxaa loo qaabeeyay si waafaqsan xeerarka iyo sharciyada kale ee khuseeya daryeelka khasabka ah ee dadka maskaxda la'.
Si uu macluumaadku u noqdo mid ay si fudud u fahmi karaan carruurta iyo dhallinyaradu waxaa dib loo qaabeeyay erayada iyo hababka wax loo yiraahdo ee la xiriira sharciyada qaarkood.

Mar walba xuquuq ayaa leedahay, xitaa marka si khasab ah laguu daryeelayo.

Buug yarahan waxaan uga sheekeyneynaa xuquuqda aad leedahay iyo xaaladaha gaarka ah ee la adeegsan karo khasabka.

Xuquuqdaada daryeelka khasabka ah – daryeel waafaqsan LPT
(nuqul nr 2020-7-6854) waxaa laga dalban karaa
Adeegga Faafinta ee Guddiga Arrimaha Bulshada.
www.socialstyrelsen.se/publikationer
E-mail: publikationsservice@socialstyrelsen.se
Fax: 035-19 75 29

Faafinta waxaa laga soo degsan karaa www.socialstyrelsen.se